Ku: waalidiinta iyo qoysaska

SOMALI

TAAGEERIDDA WAXBARASHADA CARRUURTAADA EE DHINACYADA

# AKHRISKA, QORISTA IYO XISAABTA

LAGA SOO BILAABO DHALLASHADA CARUURTAADA ILAA DHAMMAADKA YEAR 8.



MINISTRY OF EDUCATION
*Te Tāhuhu o te Mātauranga*

# TAAGEERIDDA WAXBARASHADA BILOWGA HORE EE ILMAHAAGA

## LAGA BILAABO DHALLASHADA CUNUGAAGA ILAA UU KA BILABAABO DUGSIGA



Kobcinta jacaylka cunugaaga yar u qabo barashada waxaa qeybsan kara kana heli kara waalidiinta, qoysaska iyo bulshada.

## Akhriska, qorista iyo xisaabta

Akhriska, qorista iyo xisaabtu waxay qayb ka yihiin nolol maalmeedka. Ahaanshaha akhriste, ,qore iyo xisaabyahan guulaystay waxay bilaabataa marka cunuggu dhasho. Caruurta yaryar waxay ku baranayaan akhriska, qorista iyo xisaabta wax walba oo ay arkaan ama qabtaan.

Waalidiinta iyo qoysasku waxay door muhiim ah ka qaataan waxbarashada sannadaha hore ee dhallaankooda. Waxaa jira siyaabo badan oo aad ilmahaaga uga caawin karto inay xirfad sare ka gaaraan akhriska, qorista iyo xisaabta. Tani waxay ka bilaabanaysaa mar alla markay dhashaan.

Carruurtaada oo aad la hadasho waxay waxtar aad ah uleedahay waxbarashadooda da' kasta oo ay joogaanba. Adeegso luqadda u fiican adiga iyo cunugaaga.

## Akhriska

Sannadaha hore, carruurtu waxay baranayaan "akhriska" iyo fahamka qoraallo badan oo kala duwan, calaamado muuqda ama kuwo afka laga sheego, iyo astaamo. Isla markaana waxay baranayaan in erayada iyo buugaagtu madadaalo yihiin, ayna ka buuxaan akhbaaro iyo waxyaabo xiiso leh.

### 0–1 sano jir

- Tus ilmahaaga buugaagta sawirrada ah, una akhri muddo yar kaddib markay dhashaan – tani waxay ka caawinaysaa inay ku barbaaraan jacaylka ay u qabaan akhriska intay nool yihiin.
- Rux ilmahaaga, uguna hees heeso qaafiyad leh.
- Luuqda codkaaga u isticmaal si uu madadaalo u noqdo.

### 1–3 sano jir

- Maktabadda ka xulo buugaag.
- U samee waqti caadi ah oo aad wada akhrisataan.
- Akhri noocyo kala duwan oo buugaagta ah, sida buugaagta laga fiirsado sida wax loo sameeyo iyo kuwa sheekooyinkaba (ha ahaadeen sheekooyin dhab ah ama kuwo khayaali ah), iyo waxyaabo kale oo qoran sida qoraallada kooban, ogeysiisyada daaqadaha dukaamada iyo calaamadaha.
- Adiga lafahaagu wax akhri – wargaysyada, buugta, majalladaha – tani waxay ilmahaaga ka caawinaysaa inuu arko sida akhrisku muhiim ugu yahay qoyska.

Waxbarashada sannadaha hore waxay badanaa ku timaaddaa ciyaar-mar walboo aad kari karto cayaarta ka dhig madadaalo iyo wax aad wada qabataan.

### 3–5 sano jir

- Sida badan wada akhrista sheekooyin. Ku celceli akhriska sheekooyinka ilmahaagu doorto in alla intay maqalkooda rabaan.
- Wada qaada heeso, gabayo iyo codad isku dhawaaq dhow. Alifo heeso iyo codad qaafiyad leh oo qoyskaagu leeyahay.
- Marka sheeko ay ku jiraan erayo soo noqnoqonaya, waqti ugu talogal dhammaadka weedh kasta si ilmahaagu fursad ugu helo inuu erayga ku dhawaaqo.

Gurigaaga ka dhig meel uu cunugaagu u arko in lagu qiimeeyo akhriska iyo meel uu ku jeclaado luqadda, sheekada iyo buugaagta – iyaga oo adeegsanaaya luqadda qoyskaaga.

Waqti khaas ah wada qaata – idinka oo adeegsanaaya luqadda qoyskaaga.

## Waxbarashada adeegyada dhallaanka yar yar

Akhriska, qorista iyo xisaabtu waa qayb ka mid ah waxyaabaha dhallaanka yar yari maalin walba kala kulmaan adeegyada waxbarashada dhallaanka. Dhallaanku waxay intaa baadhayaan oo tijaabinayaan fikrado la xidhiidha akhriska, qorista iyo xisaabta intay joogaan adeegga barbaarinta iyo gurigaba.

Haddii carruurtaadu tagaan adeegyada barbaarinta dhallaanka, waxaad ku caawin kartaa adigoo macallimiinta la wadaaga waxaad ku aragtay ilmahaaga oo samaynaya intay guriga joogaan. Weydii wixii ay ka arkeen ilmahaaga iyo saday carruurta ugu dhiirri gelinayaan danaynta akhriska, qorista iyo xisaabta.

Haddaad doonayso xog dheeraad ah oo ku saabsan sidaad carruurtaada uga caawin lahayd barashada amaba horumarka ilmahaagu samaynayo, weydii barayaashooda. Waxay aad ugu farxi doonaan inay ku caawiyaan.

# Qorista

Markay carruurtaadu aad u yar yar yihiin waxay maladooda, fikirkooda, dareenkooda iyo waayahooda ku muujiyaan siyaabo kala duwan. Hadalka iyo sawirku waa labo ka mida siyaabahaas, laakin caruurtu waxay kaloo bartaan inay samayn karaan "calaamado" ay dadka kale "akhrin karaan oo fahmi karaan". Tani waa bilowga qorista.

- U diyaari carruurtaada qalimo, qalimada khadda wax lagu sawiro, laabisyada wax lagu sawiro, qalin qori iyo warqad.
- Wax walba ka samee xarfaha alfabeetada; sida dhagaxda, waxyaabaha sida bulukeetiga usamaysan, galuusyada, qolfaha.
- Qaboojiyaha ku dheji xarfaha bir-labka leh.
- Ciidda ama dariiqa,ku qor xarfo aad u waaweyn ama kasamee cajiin dabadeedna idinkoo dhan kor ugu dhawaaqa.

Waa inaad danaysaa waxa carruurtaadu sawiraan ama "qoraan". Haddaadan fahmayn waxa sawiradooda ama sheekooyinkooda looga jeedo, iyaga weydii. Waxba ha ka walwalin sida qoraalkoodu u muuqdo, waxa muhiimka ahi waa waxay wax ka qorayaan.

# Xisaabta

Maalin kasta caruurta yaryar waxay ogaadaan oo adeegsadaan fikradaha xisaabta.

Waxaad taageeri kartaa fahamka iyo kalsoonida ay u qabaan xisaabta marka aad ku kaalmeysid in ay arkaan saansaanka, qaababka, cabbirka, nidaamka iyo nambarada meel kasta oo aad joogtid iyo in aad fikradaha xisaabta ku soo dartid cayaartooda, waxyaabaha ay daneeyaan iyo hawlaha ay qabtaan maalin kasta.

Waa muhiim in carruurtaadu lambarada laqabsadaan waayo waxay ku hagayaan xirfadaha xisaabta badankooda. Badanaa caruurtu waxay tiriyaan ka hor inta aysan fahmin macnaha ku jiro nambarada.

- Isticmaal tirooyinka "kow" iyo "laba" markaad hadlayso adigoo farta ku tilmaamaya qaybo ka mid ah jidhka carruurtaada – hal san, hal af, laba dhegood iyo laba lugood.
- Akhri sheekooyin iyo codad qaafiyadeysan oo tirooyin leh, tusaale: Saddex Jiir oo Indhoole ah, Goldilokis iyo Saddexdii Oorso (Di'bu).
- Tiri faraha ilmahaaga kow ilaa shan.
- Ku hees codad qaafiyad leh iyo heeso ay tirooyin ku jiraan.
- Wax tiri markaad soconayso, ama galuusyaha xidhanayso, ama cuntada miiska dhigayso, ama weelkooda qadada diyaarineyso.

Ujeeddo u isticmaal xisaabta. Caawi waxbarashada carruurtaada adigoo ku lifaaqaya xisaabta waxay horay uqabanayeen.

- Tiri adigoo kor ugu dhawaaqaya tallaabooyinka aad kor iyo hoos u qaadayso.
- Dheela ciyaaraha turubka iyo jarada ee isticmaala nambarada.
- Yaa ugu dheer? Dhabar dhabar isula jooji carruurtaada iyo saaxiibadood ama qoyskooda si loo arko kan ugu dheer iyo kan ugu gaaban.

Caawi inay carruutaadu waxbartaan adigoo ku celcelinaya oo kor ugu dhawaaqaya lambarada – adeegso luqadda u fiican adiga iyo caruurtaada. Tirinta ay nolosha maalin walba sameeyaan sida maykay miiska cuntada dhigayaan ama labisanayaan, waxay ilmahaaga ka caawinaysaa fahamka tirooyinka.



## Waxbarashada Iskuulka


Markay macallimiintu carruurta si dhab ah u yaqaanaan, waxay si wanaagsan u caawin karayaan waxbarashadooda. Inuu ilmahaaga dhab u barto waa tallaabada koowaad ee muhiimka u ah macallinka marka cunugaagu iskuulka bilaabayo. Waxaad ku caawin kartaa adigoo macallinka kala hadla waxyaabaha cunugaagu xiiseeyo oo danaynayo.

Macalimiin badan ayaa soo dhaweeya marka waalidiintu ay xogta caruurtooda la wadagaan laga bilaabo adeegga waxbarashada caruurnimadoodii hore. Xogtu waxay fududeysaa bilowga dugsiga maxaa yeelay caruurtu waxay la wadaagi karaan caruurta kale iyo macalimiinta, waana lagu celcelin karaa akhriskeeda.

Haddaad doonayso inaad xog dheeraad ah ka ogaato sidaad carruurtaada uga caawin lahayd akhriska, qorista ama xisaabta ama horumarka ay samaynayaan, weydii barayaashooda. Waxay ku farxi doonaan inay ku caawiyaan.

# EE ISKUULKA

Heerarka shaaga midabadu waxay ka bilowdaan magenta (casaan xigeen) heerkaasoo buugtu aad u fudud yihiin, dabadeedna waxay u gudbaan guduud, jaalle, buluug iyo cagaar, iyagoo marwalba sii adkaanaya.



## AKHRISKA — READING STANDARD

### Haddii ilmahaagu gaaro Reading Standard ka laga doonayo kaddib markuu hal sano iskuulka dhigto...

wuxuu akhrisanayaa buugaagta leh astaanta midabka cagaaran ee shaagga midabbada.

Cunuggaagu wuxuu fahmi doonaa sheekooyinka uu akhrisanayo, asagoo isticmaalaya erayo badan oo uu horey u yaqaanay, waxaana u suurtoobi doonta inuu hubiyo in akhriskiisu turxaan la' yahay – sida hadalka.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu fahmo kana warramo sheekooyinka uu akhrinayo
- inuu dadka kale la wadaago qaybaha uu xiisaynayo
- inuu u isticmaalo xarfaha uu garanayo inuu hubiyo ama ka sameeyo erayo cusub
- inuu garto oo isticmaalo erayo badan oo caadi ahaan la isticmaalo
- inuu turxaan la'aan wax akhriyo
- inuu akhriska ku raaxaysto iyo in uu xalliyo masalooyinka inta uu wax akhrinayo.

## QORISTA — WRITING STANDARD

### Haddii ilmahaagu gaaro Writing Standard ka laga doonayo kaddib markuu hal sano iskuulka dhigto...

qoraalkiisu wuxuu noqonayaa mid u qalma curriculum level 1.

Qoraalka ilmahaagu wuxuu noqonayaa mid leh ujoodooyin badan oo manhajka la xidhiidha. Qaybo qoraalka uu curinayo ahi waxay noqon karaan xog ku saabsan safar (cilmiga bulshada) ama daryeelid xayawaan (saynis). Ilmahaagu wuxuu awood u yeelanayaa inuu akhriyo oo ka warramo wuxuu qoray.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa inuu:**

- muujiyo inuu qorshe u samaysan karo wuxuu doonayo inuu wax ka qoro isagoo ka hadlaya, sawiraya ama erayo ku cabbiraya
- la xidhiidhiyo sheekadiisa waxyaabaha maalin walba nolosha lagala kulmo
- isticmaalo erayo badan oo uu ka bartay akhriska.

## XISAABTA — MATHEMATICS STANDARD

### Haddii ilmahaagu gaaro Mathematics Standard ka laga doonayo kaddib markuu hal sano iskuulka dhigto...

hawlqabadkiisu wuxuu noqonayaa bilowga hore ee heerka 1aad ee manhajka isagoo xalinaya masalooyin uu u adeegsanayo fahamkiisa sii kobcaya ee tirada, aljebrada, joometeriga, cabbirista iyo istaatistikada.

Cunugaagu waxay u badan tahay inuu wax tirinayo isagoo ka bilaabaya 1 isagoo isticmaalaya farihiisa ama waxyaabo kale si uu u xalliyo masalooyin. Waxaa suurtowda inuu bilaabayo inuu kor wax katiriyo isagoo gudagalaya garashada hannaanka lambarrada sida 3 + 2 = 5.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu xaliyo masalooyin xisaabeed isagoo isticmaalaya lambarada ilaa 10, dabadeedna ilaa 20
- inuu horay iyo gadaalba u tiriyo lambarada ilaa 20, kaddibna kor ilaa 100 uuna yaqaano lambarka ka horreeya iyo kan ka dambeeya lambarkasta
- inuu sahamiyo hannaanka, qaababka iyo cabbirka
- inuu habeeyo walxo oo dadka kale lawadaago
- inuu ka hadlo halkuu joogo, siduu ku gaadhay, iyo meeshuu u jeedo – " waxaan joogaa geedka hortiisa", "waxaan joogaa gadaashaada"
- inuu ogaado xaqiiqooyin xiiso leh isagoo weydiinaya kana jawaabaya su'aalo (tusaale: imisa kursi ayaa fasalka taalla?).

### In xoogga la saaro nambarka

Intuu socdo sannad dugsiyeedka koowaad ee cunugaaga, boqolkiiba 60–80 waqtiga barista xisaabtu wuxuu ku wajahan yahay barashada nambarka.

CAAWINTA WAXBARASHADA ILMAHAAGA

YEAR 1

# EE GURIGA

Waalid ahaan iyo qoys ahaan, waxaad maalin walba qayb weyn ka qaadataan waxbarashada ilmihiina, waxaad sidoo kale gacan ka geysan kartaan oo wax kusii kordhin kartaan waxay iskuulka ku baranayaan.

## Akhriska

- Dhammaan carruurtu way jecel yihiin in wax loo akhiryo, haddaba ku wad inaad wax u akhriso. Haddaad doonayso waxaad sidoo kale wax ugu akhrin kartaa afkaaga hooyo.
- Wada taga maktabadda si aad uga caawiso xulashada buugaagta ay jecel yihiin inay dadka la wadaagaan.
- Akhrisku waa fursad qaali ah oo adiga iyo ilmahaagu ku wada qaadanaysaan waqti gaar ah. Ka yeel akhriska:
  - Mid deggan oo lagu nasto
  - Waqti aad ilmahaaga dhinac fadhiisatid
  - 10–15 daqiiqo oo aan carqalad lahayn, kana fog TVga.

Sii ilmahaaga fursad ay kaga hadlaan waxa ka dhacaya sheekada.



Aad ula hadal carruurtaada markaad wax wada qabanaysaan. Adeegsiga afkaaga hooyo markaad ilmahaaaga la hadlayso waxay caawinaysaa barashadooda.

## Qorista

- Waxaad ilmahaaga ka caawin kartaa inay wax ka qoraan sawir gacmeed ay sameeyeen – iyagoo warqad ama kombiyutarka isticmaalaya.
- Ku caawi inay email ama qoraal kale u diraan qof qoyska ka mid ah ama saaxiib.
- Waxqorista ka dhig mid madadaalo ah adigoo dhulka wax kula qoraya buraashka rinjiga iyo biyo.

Ka hadal waxay ilmahaagu qorayaan. Danee. Haddaadan fahmayn waxa looga jeedo sawir gacmeedkooda ama sheekadooda, iyaga weydii.



## Xisaabta

- Isu imaada adiga iyo carruurtaadu oo sameeya xujooyinka (jigsaw puzzles), ciyaara turub, qaab dhismeedyo, iyo ciyaaraha looxa.
- Ku dhiirri geli carruurtaada ka qaybgalka, diyaarinta iyo wadaagista cuntada – “mid adigaa leh midna aniga”. Weydii su’aalo sida “immisa ayuu helayaa qofwalba oo naga mid ah?”

Isticmaal erayo xisaabeed badan markay ilmahaagu ciyaarayaan, si fahamkooda hore ee xisaabtu u kobco (“dusha/sare” “hoose” “koowaad, labaad, saddexaad”, “wareegsan”, “dhexmarid/kadusid”, “kahorrayn”, “kadambayn”). Haddaad doonayso waad isticmaali kartaa afkaaga hooyo.



**Ma doonaysaa inaad xog dheeraad ah ogaato?**

Xog dheeraad ah iyo talo bixin ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo horumarkiisa, waxaad kala hadli kartaa macallinkiisa.

www.minedu.govt.nz/ParentsSupportingYourChild

EE ISKUULKA

Heerarka shaaga midabadu waxay ka bilowdaan magenta (casaan xigeen) kaasoo buugtu aad u fudud yihiin, dabadeedna waxay u gudbaan guduud, jaalle, buluug, cagaar iyo oranji (jaalle guduud xiga) ilaa turkuwos, iyagoo marwalba sii adkaanaya. Cunugaagu wuxuu fasalka saddexaad ku qaadan doonaa heerarka midabada barbel (casaan buluug xiga) iyo dahabi.



# AKHRISKA

READING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Reading Standard ka laga doonayo kaddib markuu laba sano iskuulka dhigto...

wuxuu akhrisanayaa buugaagta leh astaanta midabka turkuwos (buluug cagaar xiga) ee shaagga midabbada.

Cunugaagu wuxuu guriga keeni doonaa buugaagta khayaaliga iyo kuwa aan khayaaliga ahayn. Sheekooyinka waa dheeraan doonaan, waxaana dhici karto in ay ka mid noqdaan jaantusyo ay la socdaan calaamado, qaar ka mid ah ereyada la yaqaan, qaar cusub oo ka mid ah ereyada mowduuca iyo luqadda loo isticmaalo sharaxaadda.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu isticmaalo aqoontiisa xarfaha iyo erayada kale si uu xal ugu helo erayo cusub
- inuu akhriyo weedhooyin buuxa isagoon hakad weyn samaynayn, uuna isticmaalo calaamadaha xarakada qoraalka, si akhrisku u noqdo mid turxaan la'aan ah oo xiiso leh
- inuu garto markuu khalad weyn sameeyo (gaar ahaan haddii wuxu macne samayn waayo) uuna fahmo siduu u sixi lahaa, waqtiyada inta badan
- inuu isticmaalo summado tilmaan bixin ah, hadallo lagu cabbirayo fikirka sawir-gacmeed, jaantusyo iyo jadwallo ka caawinaya fahamka sheekada
- inuu kaligii hoos wax u akhristo
- inuu sheego in sheekadu tahay dhab ama mid la alifay, oo xusuusto qaybaheeda muhiimka ah, uuna awoodi karo inuu helo qaybaha ka jawaabaya su'aalaha.

# QORISTA

WRITING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaaro Writing Standard ka laga doonayo kaddib markuu laba sano iskuulka dhigto...

heerka wax qoristiisu waxay udhigmaysaa curriculum level 1.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu qoro sheekooyin iyo qoraalo nooc kale ah oo uu iskuulka iyo gurigaba ku isticmaali karo. Kuwan waxaa ka mid ah amarro sahlan, sharaxaad ku saabsan waxa dhacaya iyo sida wax u dhacayaan, sifayn fudud ee dadka, iyo walxaha uu arkay ama sameeyey, wax ka yaqaan ama uu alifayo
- inuu inta badan si sax ah u isticmaalo calaamad su'aalka, joogsiga iyo xarfaha waaweyn
- inuu si sax ah u higgaadiyo erayo badan, uuna isku dayo qorista erayo cusub isagoo adeegsanaya wuxuu ka yaqaan erayada la midka ah
- inuu qoro weedhooyin dheerdheer iyo xidhiidhiyeyaal sahlan ("sida", "iyo") si uu isugu xidho weedhooyinka.

# XISAABTA

MATHEMATICS STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaaro Mathematics Standard ka ee laga doonayo kaddib markuu laba sano iskuulka dhigto...

hawlqabadkiisu wuxuu noqonayaa heerka 1aad ee manhajka waxbarashada isagoo xallinaya masalooyin uu u kaashanayo fahamkiisa sii kordhaya ee tirada, aljebrada, joometeriga, cabbiridda iyo istaatistikada.

Cunugaagu wuxuu wax u tirin doonaa horay iyo gadaal isagoo kor wax ka tirinaya, kana bilaabaya lambarka ugu weyn intii uu ka bilaabi lahaa kow. Waxaa laga yaabaa in cunugaagu isticmaalo farihiisa si taasi uga caawiso tirooyinka.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu xalliyo masalooyin isagoo isticmaalaya tirooyinka ilaa 100

### In xoogga la saaro nambarka

Inta lagu jiro sannad dugsiyeedka labaad ee cunugaaga, boqolkiiba 60–80 waqtiga barista xisaabtu wuxuu ku wajahan yahay barashada nambarka.

- inuu laba-labo, shan-shan, toban-toban wax u tiriyo horay iyo gadaal
- inuu helo badhka iyo rubaca qaabab sahlan iyo darsino alaabo ah
- inuu alaabada u kala saaro kooxo caadi ah uuna sharxo wuxuu qabtay
- inuu weydiiyo kana jawaabo su'aalo uuna soo bandhigo xaqiiqooyin
- in laga helo talo soojeedin iyo talo raacid
- inuu cabbiro alaab isagoo adeegsanaya gacmihiisa, lugihiisa ama qalin qori.

CAAWINTA WAXBARASHADA ILMAHAAGA

YEAR 2

# EE GURIGA

Waalid ahaan iyo qoys ahaan, waxaad maalin walba qayb weyn ka qaadataan waxbarashada ilmihiina, waxaad sidoo kale gacan ka geysan kartaan oo wax kusii kordhin kartaan waxay iskuulka ku baranayaan.

## Akhriska

- Ku boorri carruurtaadu inay akhriyaan waxyaabo farabadan – jadwalka TVga ee wargeysyada kusoo baxa, calaamadaha jidadka, xogta kuqoran cunnooyinka. Liistooyinka fudud ee habraaca cunto karintu waa wax aad u wanaagsan – xitaa waxaad cunaysaa wixii aad akhrisay.
- Wada taga maktabadda si aad uga caawiso xulashada buugaagta ay jecel yihiin inay dadka la wadaagaan.
- Dheel ka sameeya dhawaqa iyo erayada, uyeela qaafiyad markay idiin suurtowdaba, dheela erayo ciyaareed badan sida ciyaarta "waan jaajuusi".


Ka yeel akhriska guriga mid sahlan oo madadaalo ah – wax adiga iyo ilmahaaguba aad higsanaysaan, waqti hadal iyo qosol leh.


Lahadalka carruurtaadu waa arrin aad ugu wanaagsan waxbarashadooda da' kasta ha ahaadeene. Adeegso labada afba, Ingiriiska iyo afkaaga hooyo – kolba kii idiin sahlan adiga iyo carruurtaada.

## Qorista

- Ku dhiirrigeli carruurtaada inay wax qoraan – iyagoo isticmaalaya warqad ama kombiyuter. Xitaa way kuu furan tahay inaad kacaawiso qorista –. Aad u bogaadi ilmahaaga, gaar ahaan markaad aragto iyagoo dadaal samaynaya.
- Samee buug sawirro ah, dabadeedna carruurtaadu ha ku qoreen ciwaan iyo faallo sawir kasta laxidhiidhta, iyadoo ay weheliyaan magacyada dadka iyo waxay qabanayaan.

Soo bandhig hawl qabadkooda, kuna faan. Lana wadaag dadka kale.





## Xisaabta

- Ka caawi carruurtaadu inay helaan oo isku xidhaan tirooyinka laga heli karo gurigaaga iyo xaafaddaada; tusaale 7 kutaal sanduuqa boostada, 17 mid kale kuqoran iyo mid kale oo 27 ah.
- La dheel carruurtaada ciyaar lambareed gaar ahaan adigoo isticmaalaya hannaan xisaabeed isla markaana samaynaya nidaam iswaafaqsan markaad horey iyo gadaal wax u tirinayso (tusaale: 5, 10, 15, 20 … iyo 20, 15, 10, 5).

Xisaabtu waa qayb muhiim ah ee nolosha maalin walba, waxaana jira siyaabo badan oo aad carruurtaada maaweelo uga dhigi karto.

**Ma doonaysaa inaad xog dheeraad ah ogaato?**

Xog dheeraad ah iyo talo bixin ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo horumarkiisa, waxaad kala hadli kartaa macallinkiisa.

**www.minedu.govt.nz/ParentsSupportingYourChild**

WAXBARASHADA ILMAHAAGA

The New Zealand Curriculum

ILMAHAAGU MARKUU SADDEX SANO ISKUULKA DHIGTO DABADEED

EE ISKUULKA

Heerarka shaaga midabadu waxay ka bilowdaan magenta (casaan xigeen) kaasoo buugtu aad u fudud yihiin, dabadeedna waxay u gudbaan guduud, jaalle, buluug, cagaar iyo oranji (jaalle guduud xiga) ilaa turkuwos (buluug cagaar xiga) iyo barbel ilaa dahabi, iyagoo midabba kuu ka dambeeyo marwalba kasii yara adkaanayo.



# AKHRISKA

READING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Reading Standard ka laga doonayo kaddib markuu saddex sano iskuulka dhigto...

Wuxuu akhrisanayaa buugaagta leh astaanta midabka dahabiga ah ee shaagga midabbada.

Buugaagta cunugaagu guriga keenayo si uu kuugu akhriyo waxaa laga yaabaa inay ku jiraan bogag aan sawir lahayn iyo goobo, dhacdooyin, mawduucyo iyo erayo ku cusub. Cunugaagu wuxuu adeegsan kari doonaa sawirada iyo astaamaha kale ee qoraalka (ciwaanada hoose, qoraallada xaraysan, qoraalka tixraaca ah ama wax sharxaya ee bogga salkiisa lagu qoro, eraybixinta, tusmooyinka xarfaha ku salaysan, jaantusyo iyo khariidado) si uu macnaha u fahmo. Waxaa kaloo laga yaabaa in ilmahaagu akhrisanayo maqaallo ku saabsan saynis, farshaxan ama qaybo kale ee manhajka ah – tusaale: xog ku saabsan wareegga nolosha cayayaanka.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu isticmaalo sawirka ama macnaha sheekada si uu xal ugu helo erayo ku cusub, ama micnohooda u fahmo
- inuu badanaaba garto markuu khalad sameeyo uuna saxo
- inuu helo akhbaar si cad sheekada loogu sheegay, iyo sidoo kale akhbaar aan aad u caddayn ama la ishaaray
- inuu ka hadlo micnaha sheekada uuna kuu sheego wixii uu ka bartay akhrinta mawduuc gaar ah, iyo hubinta inuu garanayo wax u dhigma inta qoraagu ka yaqaan markuu akhrinayo wax ku saabsan laan cilmiga ka mid ah ee uu danaynayo.

# QORISTA

WRITING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaaro Writing Standard ka laga doonayo kaddib markuu saddex sano iskuulka dhigto...

hawlqabadka wax qoristiisu waxay kusii dhowaanaysaa curriculum level 2.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu kafiirsado, diiwaan geliyo uuna soo gudbiyo khibrado, fikrado iyo akhbaaro
- inuu isku dubarido qoraalkiisa isagoo isticmaalaya qaabdhismeed aasaasi ah, tusaale: inuu qoro qoraal leh bilow, dhextaal iyo dhammaad
- inuu sameeyo qoraallo leh ujeedooyin badan oo manhajka waxbarashada la xidhiidha, tusaale: warbixin ku saabsan social sciences
- inuu sida badan qoro weedhooyin sahlan (mararka qaarna qaar adag) oo bilowgooda iyo dhererkoodu kala duduwan yahay
- inuu isticmaalo erayada qaar si gooni ah mawduuca ula xidhiidha loona xushay dadka qoraalka loogu talo galay
- inuu badanaa si sax ah u higgaadiyo erayada uu isticmaalayo, uuna adeegsado wuxuu ka yaqaano dhawaqa erayada si uu isugu dayo inuu higgaadiyo erayada aanu horey u aqoon
- inuu kaashado aqoontiisa calaamadaha xarakada qoraalka uuna isticmaalkooda badiyo.

# XISAABTA

MATHEMATICS STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaaro Mathematics Standard ka laga doonayo kaddib markuu saddex sano iskuulka dhigto...

hawlqabadkiisu wuxuu u dhigmayaa bilowga curriculum level 2 isagoo adeegsanaya fahamkiisa sii kobcaya ee tirada, aljebrada, joometeriga, cabbirista iyo istaatistikada.

Ilmahaagu wuxuu barandoonaa xallinta masalooyinka xisaabeed isagoo tirooyinka kala jejebinaya oo kolba dhinac u wareejinaya isagoon wax tirinayn. Tusaale ahaan, 8 + 5 waxay noqon kartaa 8 + 2 + 3.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu sahamiyo hannaanka tirooyinku isu raacaan ilaa 1,000
- inuu u isticmaalo aqoontiisa xisaabta aasaasiga ah xallinta masalooyinka

### In xoogga la saaro nambarka

Inta lagu jiro sannad dugsiyeedka saddexaad ee cunugaaga, boqolkiiba 60–80 waqtiga barista xisaabtu wuxuu ku wajahan yahay barashada nambarka.

- inuu ka hadlo jajabka (qurubyada) markuu qaababka iyo cadadka sahaminayo ama cid la wadaagayo
- inuu isku habeeyo walxaha kana warramo wixii kala duwan iyo wixii isku mid ah
- inuu curiyo oo sifeeyo hannaan xisaabeedyo
- inuu walxaha cabbiro oo waqtina u qabto
- in uu bixiyo iyo in uu raaco tilmaanta
- inuu ka hadlo sababaha la xidhiidha in ay dhacdo tahay mid suurtowda ama midaan suurtogal ahayn
- inuu baadhitaan kusameeyo mawduuc, uuna soo bandhigo kana munaaqishoodo wuxuu soo ogaaday.

# CAAWINTA WAXBARASHADA ILMAHAAGA

YEAR 3

## EE GURIGA

Waalid ahaan iyo qoys ahaan, waxaad maalin walba qayb weyn ka qaadataan waxbarashada ilmihiina, waxaad sidoo kale gacan ka geysan kartaan oo wax kusii kordhin kartaan waxay iskuulka ku baranayaan.

Aad ula hadal carruurtaada markaad wax wada qabanaysaan. Adeegsiga afkaaga hooyo markaad ilmahaaga la hadlayso waxay caawinaysaa barashadooda.

### Akhriska

- Wax u akhri carruurtaada maalin walba.
- U indho dheerow fursadaha carruurtaadu wax ku akhrisan karaan meel kastoo aad joogto – astaamaha, tabbeelooyinka xayeysiiska, warqadaha aan loo baahnayn ee sanduuqa boostada lasoo geliyo, wargeysyada, liistada tixraaca cunto karinta.
- Tus carruurtaada in akhrisku yahay wax lagu madadaasho iyo inuu adiga muhiim kuu yahay oo ha arkaan adigoo wax akhrinaya.

In badan booqo maktabada oo ka caawi carruurtaada xulashada buugaag la xidhiidha mawduucyo ay danaynayaan. Gee barnaamijyada fasaxyada ee maktabaduhu qaban qaabiyaan.



### Qorista

- In wax laqoro iyadoo ujeeddo dhab laga leeyahay waxay carruurtaada ka caawin kartaa rabitaanka wax qorista. Ka caawi inay diraan kaadhadhka mahadnaqa, inay email qoraan, ama qoraallo yar yar qoraan oo boostada ku diraan.
- Ku dhiirrigeli carruurtaada inay qoraan sheeko ama sheeko taariikheed khayaali ah oo aad wada matali kartaan.
- Erayo iyo xarfo kasoo jar majalado iyo wargeysyo si aad uga samaysaan sheekooyin, gabayo, halxidhaaleyaal iyo kaadhadh.


Qoraalku ha ahaado mid madadaalo leh oo adeegso marmarsiyo kasta oo aad ka fekari karto si aad carruurtaada ugu dhiirrigeliso inay marwalba wax qoraan oo wax walba wax ka qoraan.



### Xisaabta

- Isutaga adiga iyo carruurtaadu oo sameeya hawlqabad waqtiyeysan. Qabo saacad iyaguna ha tiriyeen inta goor ee ay daqiiqadiiba kubbad boodbootin karaan.
- Carruurtaadu haka qaybgaleen caawinta suuqa – weydii inay soo helaan alaabo cayiman (koombo digirta cas oo dhexdhexaad ah, 2 litir oo caana ah, 250-g oo ah hilibka shiidan ee la duubo).

Xisaabtu waa qayb muhiim ah ee nolosha maalin walba, waxaana jira siyaabo badan oo aad carruurtaada maaweelo uga dhigi karto.



**Ma doonaysaa inaad xog dheeraad ah ogaato?**

Xog dheeraad ah iyo talo bixin ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo horumarkiisa, waxaad kala hadli kartaa macallinkiisa.

EE ISKUULKA

# AKHRISKA

## READING STANDARD

### Haddii ilmahaagu gaadho Reading Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 4...

heerka akhriskiisu wuxuu noqonayaa curriculum level 2.

Cunugaagu wuxuu akhrin doonaa sheekooyin kala duwan oo dhab iyo khayaaliba isugu jira si uu ugu kaashado waxbarashadiisa la xidhiidha dhammaan qaybaha manhajka.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu ogyahay wuxuu jecel yahay inuu akhriyo uuna awoodi karo doorashada wixii ku habboon
- inuu fahmo wuxuu akhrinayo oo uu ka hadli karo fikradaha ugu muhiimsan iyo kuwa aan aad u caddayn
- inuu garto oo fahmo xogta ku jirta buugaag noocyo kala duwan ah
- inuu turxaan la'aan wax u akhrin karo, sidii asagoo hadlaya oo kale
- inuu dareemo markuu khalad sameeyo akhriska dhexdiisa uuna sixi karo, waqtiyada intooda badan
- inuu wax akhriyo si uu u helo akhbaar, sida jawaabaha su'aalaha.

# QORISTA

## WRITING STANDARD

### Haddii ilmahaagu gaadho Writing Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 4...

heerka waxqoristiisu waxay noqonaysaa curriculum level 2.

Cunugaagu wuxuu qori doonaa waxyaabo kala duwan oo uu u kaashado waxbarashadiisa la xidhiidha dhammaan qaybaha manhajka.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu qoraalkiisa u isticmaalo ka fiirsashada, diiwaangelinta iyo soo gudbinta khibrado, fikrado iyo akhbaar
- inuu sameeyo qoraal ujeedoyin kala duwan leh
- inuu ogyahay in loo baahan yahay in qoraalkiisu noqdo mid ku habboon dadka loogu talo galay
- inuu badanaaba qoraalkiisa akhriyo uuna wax ka beddelo oo sii wanaajiyo
- inuu badanaaba garto khaladaadka higgaadda, naxwaha iyo xarakaynta uuna saxo qoraalkiisa
- inuu daabaco qoraalkiisa isagoo adeegsanaya dariiqooyin kala duwan oo ay ka mid yihiin isticmaalka kombiyutarada, sawirqaado (kamarad) tusaalooyin iyo jaantusyo.

# XISAABTA

## MATHEMATICS STANDARD

### Haddii ilmahaagu gaadho Mathematics Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 4...

heerka hawl qabadkiisa xisaabeed wuxuu u dhigmayaa curriculum level 2 isagoo adeegsanaya fahamkiisa sii kobcaya ee tirada, aljebrada, joometeriga, cabbirista iyo istaatistikada.

Cunugaagu wuxuu xallin doonaa masalooyin isaga oo adeegsanaaya isku darka aasaasiga ah, kala goynta, isku dhufashada fudud iyo aqoonta sare ee ku saabsan meeleynta qiimaha..

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu adeegsado tirooyinka ilaa 1000
- inuu adeegsado aqoontiisa jadwalada isku dhufashada 2, 3, 4, 5, iyo 10 si uu u xalliyo masalooyinka
- inuu garto jajabyada darsimo, qaabab iyo cadadyo

#### In xoogga la saaro nambarka

Inta lagu jiro Year 4, boqolkiiba 60–80 waqtiga barista xisaabtu wuxuu ku wajahan yahay barashada nambarka.

- inuu sameeyo oo sii wado hannaan xisaabeedyo uuna sharxo qaaciddadooda
- inuu kala saaro alaabooyin uuna sharax kabixiyo sida laysu raacsiiyey (tusaale: qaab iyo qaro/baaxad)
- inuu doorto sida ugu habboon ee loo cabbiro dhererka, bedka, mugga, qaadka, culayska, heerkulka iyo waqtiga
- inuu isticmaalo khariidado sahlan si uu u tilmaamo meesha iyo jihada
- inuu ka hadlo waxyaabo dhici doona ama aan dhici doonin
- inuu alifo su'aalo uu baadhitaan ku sameeyo, dabadeedna garaaf ku muujiyo kana munaaqishoodo wuxuu soo ogaaday.

Waalid ahaan iyo qoys ahaan, waxaad maalin walba qayb weyn ka qaadataan waxbarashada ilmihiina, waxaad sidoo kale gacan ka geysan kartaan oo wax kusii kordhin kartaan waxay iskuulka ku baranayaan.

# EE GURIGA

## Akhriska

- Carruurtaadu ha kuu sheegeen waxay akhrinayaan:
  - kuu yahay shaqsiyedda ay ugu jecel yihiin iyo sababta?
  - maxay latahay inuu dhici doono?
- Dhegeyso maalin walba markay carruurtaadu wax akhrinayaan.
- Xataa, ciyaaraha looxa iyo kaadhadhku waa muhiim. Doorta ciyaaro qofwalba doonayo inuu ka qaybqaato.

Fursad usii carruurtaada inay waxay akhrinayaan noloshooda laxidhiidhiyaan. Xusuusi waxay sameeyeen marka wax taa lamid ahi sheekada dhexdeeda ka dhoco.

In badan la hadal carruurtaada markaad wax wada qabanaysaan. Adeegso luqadda u fiican adiga iyo carruurtaada.



## Qorista



- Carruurtaada ku dhiirrigeli inay kombiyutarka ku qoraan imeelo, kaadhadhka hambalyada dhalashada, gabayo, kaftan iyo waraaqo. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaan kombiyutarka maktabada.
- Kawada shaqeeya ciyaaraha yar yar ee erayada oo laga helo qaybta carruurta ee wargeyska.
- Ciyaar ka dhigta erayada. Ka fekera erayo xiiso leh, ka wada munaaqishooda kuwo cusub, qaamuuskana erayo ka raadiya. Tani waxay kordhin kartaa erayada carruurtaadu isticmaalayaan markay wax qorayaan.

Tusaale wanaagsan u noqo carruurtaada. Tus carruurtaada inaad wax u qorto sababo kala duwan dartood. Ha ku arkaan adigoo wax qorista ka helaya. Xataa mararka qaar iyaga qoraal u dir. Haddaad rabto waxaad adeegsan kartaa afkaaga hooyo – tani waxay sidoo kale caawinaysaa waxbarashada carruurtaada.

## Xisaabta

Waxaa jira hawlqabadyo maalin walba carruurtaadu ku lug yeelan karaan, waxaana ka mid ah:

- raadinta iyo iskuxidhka tirooyinka laga heli karo gurigaaga iyo xaafaddaada – saacad, sanduuqyo boosto, calaamadaha xawaaraha baabuurta, calaamadaha muujinaya fogaanta
- ka fekerista inta lambar taleefoon ay xusuusan karaan – ka hadla waxay sameeyaan inay ka caawiyaan xusuusta tirooyinka is dabataxan
- go'aan ka gaadhista lacag intee le'eg ayaad u baahan doontaan inaad mitirka baarkinka ku ridaan, iyo waqtiga la rabo inaad gaadhiga kusoo noqotaan, intaan waqtiga mitirku dhicin.

Habka ilmahaagu u baranayaan xallinta masalooyinka xisaabta waxaa laga yaabaa inuu ka duwan yahay kii markaad adigu iskuulka dhigan jirtay. Ha ku tuseen siday wax u sameeyaan kuna taageer waxay baranayaan.



**Ma doonaysaa inaad xog dheeraad ah ogaato?**

Xog dheeraad ah iyo talo bixin ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo horumarkiisa, waxaad kala hadli kartaa macallinkiisa.

WAXBARASHADA ILMAHAAGA

The New Zealand Curriculum

DHAMMAADKA YEAR 5

EE ISKUULKA

# AKHRISKA

READING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Reading Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 5...

heerka akhriskiisu wuxuu ku beegan yahay curriculum level 3.

Cunugaagu wuxuu akhrin doonaa sheekooyin kala duwan oo dhab iyo khayaaliba isugu jira si uu ugu kaashado waxbarashadiisa la xidhiidha dhammaan qaybaha manhajka

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu muddo dheer wax akhriyo
- inuu doorto sheekooyin caawinaya barashadiisa iyo sheekooyin uu madadaalo u akhrisanayo
- inuu doorto xirfadaha akhriska uu isticmaalayo markuu akhriska dhib kala kulmo ama markuu akhrisanayo sheekooyin adag – tusaale: inuu dib u akhriyo qaybaha uuna fahmin
- inuu xal u helo erayada uusan aqoon iyadoo erayo kale loo adeegsanaayo masalada, sawirro ama tilmaameyaal kale
- inuu fahmo kana munaaqishoodo heerarka micnaha sheeko yeelan karto – tusaale: fahamka micnaha qarsoon
- inuu akhriyo sheekooyin kala duwan oo ku saabsan hal mawduuc, uuna xogtaas isu gayn karo si uu fikrad usoo bandhigo ama mawduuc wax uga qoro
- inuu weydiiyo kana jawaabo su'aalo laxidhiidha waxyaabaha uu akhrinayo
- inuu ka munaaqishoodo sida qoraayadu wax u kala doortaan markay wax qorayaan. Inuu ka hadlo erayada, goobaha, shaqsiyaadka iyo fikradaha qoraayadu doorteen.

# QORISTA

WRITING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Writing Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 5...

heerka waxqoristiisu wuxuu ku beegan yahay curriculum level 3.

Qoraalka cunugaagu wuxuu muujin doonaa sida uu uga fekerayo, oo u sifeynayo khibradihiisa iyo xogta uu ka helayo ka hadalka, dhegeysiga iyo akhriska mawduucyo dhammaan qaybaha manhajka khuseeya.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu adeegsado dariiqyo kala duwan oo uu kaga fekero, qorshaynta, isku dubaridka iyo soo gudbinta khibrado, fikrado iyo akhbaar
- inuu isticmaalo erayo iyo weedhooyin mawduuc la xidhiidha oo loo xushay dhageysteyaasha
- inuu doorto dariiqa ugu habboon ee uu ku cabbirayo farriin ama fekrado
- inuu isku dubarido qoraalkiisa, oo isticmaalo faahfaahin xoojinaysa fikradaha muhiimka ah iyo baaragaraafyada si uu fikradihiisa isugu geeyo
- inuu horumariyo caddaanta iyo saameynta qoraalkiisa, badanaa markuu jawaab celin ka helo dadka kale
- inuu hubiyo in higgaada, naxwaha iyo xarakaynta qoraalkiisu sax yihiin
- inuu doorto habka ugu wanaagsan ee uu ku daabici karo qoraalkiisa, oo uu ka mid tahay farsamada kombuyutarka, daabacaadda, khariidado iyo jaantusyo.

# XISAABTA

MATHEMATICS STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Mathematics Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 5...

hawl qabadkiisa xisaabeed wuxuu noqonayaa bilowga heerka 3aad ee manhajka, isagoo adeegsanaya fahamkiisa sii kobcaya ee tirada, aljebrada, joometeriga, cabbirista iyo istaatistikada.

Cunugaagu wuxuu baran doonaa xalinta masalooyinka xisaabta oo dheeraad ah, kuwaasoo leh tallaabooyin dhowr ah oo loo baahan yahay inuu doorto habka ugu wanaagsan ee ka caawin kara inuu xal u helo. Cunugaagu wuxuu baran doonaa habab kala duwan oo masalooyinka lagu xaliyo.

### In xoogga la saaro nambarka

Inta lagu jiro Year 5, boqolkiiba 50–70 waqtiga barista xisaabtu wuxuu ku wajahanaan doonaa barashada xalinta masalooyinka iyadoo la isticmaalayo barashada nambarka.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu doorto hab wanaagsan (una adeegsado +, –, x, ÷) iyo inuu si caddaan ah ugu sharaxo dad kale
- inuu u adeegsado aqoontiisa xisaabta aasaasiga ah xallinta xaqiiqooyin ku cusub iyo in uu helo jajabyo, qaabab iyo qiyaas
- inuu kala saaro qaabab 2 dhinacle ah iyo kuwo 3 dhinacle ah uuna u sabab yeelo sida koox koox laysugu raacsiiyey
- inuu adeegsado calaamadaha tixraaca khariidadaha iyo bartilmaameedyada jiheeyaha si uu u sifeeyo meesha alaabo taal
- inuu cabbiro weynaanta iyo mugga qaababka
- inuu sahamiyo aragtida guud ee waxyaabaha u dhaca sida lama filaanka ah isagoo qoraya liiska dhammaan natiijooyinka suurtogalka ah
- inuu baadho su'aalo, muujiyo xogta kana munaaqishoodo macluumaadka.

CAAWINTA WAXBARASHADA ILMAHAAGA

# EE GURIGA

YEAR 5

Waalid ahaan iyo qoys ahaan, waxaad maalin walba qayb weyn ka qaadataan waxbarashada ilmihiina, waxaad sidoo kale gacan ka geysan kartaan oo wax kusii kordhin kartaan waxay iskuulka ku baranayaan.

## Akhriska

- Kawada hadla noocyo kala duwan oo akhriska ah (maqaallada wargeyska, rugaha Internetka, majaajilooyin, sheekooyin soojireen ah, heeso ama buugta sheekooyinka la alifey ah). Raadi maqaal wargeys oo adiga iyo carruurtaaduba danaysaan kana wada hadla micnaha uu u samaynayo qofwalba oo idin ka mid ah. Kawada hadla waxaad akhrinaysaan iyo sababta aad uga helaysaan ama wixii ku jira ee taxadi idin ku sameeya.
- Si joogto ah u booqda maktabada oo ka caawi carruurtaada xulashada buugaag ay danaynayaan ama ku saabsan waxay iskuulka ku baranayaan. Sidoo kale waxaa laga yaabaa inay u baahdaan gacan qabasho ah inaad u akhriso.

Da' kasta ha ahaadeene, carruurtaada oo aad wax u akhriso waxay ka mid tahay waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad qaban kartid. Haddaad doonayso waxaad sheekooyin ugu akhrin kartaa afkaaga hooyo – waxay taasi wax ka taraysaa barashada carruurtaada.

In badan lahadal carruurtaada markaad wax wada qabanaysaan. Adeegso luqadda u fiican adiga iyo carruurtaada.



## Qorista

Qoraalku ha noqdo mid madadaalo leh oo adeegso marmarsiyo kasta oo aad ka fekari karto si aad carruurtaada ugu dhiirrigeliso inay marwalba wax qoraan oo wax walba wax ka qoraan.

- Ka caawi carruurtaadu inay xusuus qor ka sameeyaan waxyaabahay nolosha kala kulmeen, qoyskooda iyo saaxiibadood ama fasaxoodii. Waxay isticmaali karaan sawirro, sawir gacmeedyo ama buug yar yar oo la jaray si ay qoraalkooda u bayaamiyaan.
- Qoraal u dir carruurtaada kuna dhiirrigeli inay kuu soo jawaab celiyaan. Waxaad wadaagi kartaan imeello, kaadhadhka casuumaada, warqadaha mahadnaqa iyo kaftan – ka yeel madadaalo.



## Xisaabta

- Ku celceliya jadwallada kudhufashada – ka hubi carruurtaada ama macallinkooda jadwallada aad ka caawin karto.
- Isutaga adiga iyo carruurtaadu oo dheela ciyaaro – ciyaaraha kaadhadhka iyo looxaanta ee loo adeegsado malaha iyo hubinta.

Inay xisaabta kalsooni ku yeeshaan waa wax dhab ahaan muhiim u ah waxbarashada carruurtaada – xataa haddii adigu aadan jeclayn ama aadan ku fiicnayn markaad iskuulka dhigan jirtay.



**Ma doonaysaa inaad xog dheeraad ah ogaato?**

Xog dheeraad ah iyo talo bixin ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo horumarkiisa, waxaad kala hadli kartaa macallinkiisa.

www.minedu.govt.nz/ParentsSupportingYourChild

# AKHRISKA

READING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Reading Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 6...

heerka akhriskiisu wuxuu noqonayaa curriculum level 3.

Cunugaagu wuxuu akhrin doonaa buugta aan khayaalka ahayn, buugta cutubyada leh, majaladaha, iyo akhbaaraha kombiyutarka ku jira. Wuxuu akhrinayaa noocyahan sheekooyinka ah oo ku saabsan dhammaan qaybaha manhajka.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu dhaqso ku akhriyo sheekooyin dhaadheer, uuna muddo dheer wax akhriyo
- inuu si fudud sheekada uga helo xog iyo fikrado, iyo sidoo kale akhbaar aan si fudud loo garan karin – isagoo adeegsanaya bidhaamo sheekada ku jira iyo wixii uu hore u yaqaanay
- inuu xal u helo erayo aanu micnahooda aqoon isagoo isticmaalaya bidhaaminta sheekada dhexdeeda laga heli karo ama sawiro iyo jaantusyo
- inuu dhaqso u helo xogta iyo fikradaha muhiimka ah {isagoo akhris dhaqsa ah "dulkaxaadin" iyo "dulmaris" ku samaynaya (tusaale: isagoo isticmaalaya ciwaanada hoose, erayada muhiimka ah ama weedha ugu horraysa baaragaraafka)}
- inuu ogyahay in mararka qaar loo baahan yahay akhriska akhbaarta ilo kala duwan (buugaag, majalado, Internetka) si uu u helo dhammaan xogta hawshiisa ee uu u baahan yahay.

# QORISTA

WRITING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Writing Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 6...

qoraalkiisu wuxuu noqonayaa heerka 3aad ee manhajka.

Qoraalka cunugaagu wuxuu ahaan doonaa mid muujiya:

- siduu uga fiirsanayo una sifaynayo khibradihiisa
- xogta uu ka helayo ka hadalka, dhegeysiga iyo akhriska mawduucyo khuseeya dhammaan qaybaha manhajka.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu doorto nooca qoraalka ku habboon cidda akhrin doonta
- inuu siyaabo kala duwan u qorsheeyo wuxuu qorayo
- inuu qoraalkiisa u habeeyo si caqli gal ah isagoo isticmaalaya baaragaafyo iyo qaababka kale sida ciwaan hoosaadyo, sawiro iyo tacliiqyo
- inuu si taxadar leh oo mawduuca iyo ujeedada waafaqsan erayada u xusho, uuna qoraalkiisa ka dhigo mid ay dadku rabaan inay akhristaan
- inuu eego oo hubiyo in qoraalkiisu macna samaynayo
- inuu saxo higaadinta erayada intooda badan uuna isticmaalo xarakayn habboon.

# XISAABTA

MATHEMATICS STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Mathematics Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 6...

heerka hawlqabadkiisa xisaabtu wuxuu noqonayaa curriculum level 3 isagoo adeegsanaya fahamkiisa sii kobcaya ee tirada, aljebrada, joometeriga, cabbirista iyo istaatistikada.

Cunugaagu wuxuu baranayaa xallinta masalooyin badan kuwaasoo leh tallaabooyin dhowr ah oo loo baahan yahay inuu doorto habka ugu wanaagsan xallintooda. Cunugaagu wuxuu baran doonaa habab kala duwan oo lagu xaliyo masalooyinka, waxaana u suurtoobi doonta inuu bayaan xisaabeed ka sameeyo tirooyinka iyo hannaan-xisaabeedyada.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu xalliyo masalooyin badan oo dheeraad ah (una adeegsado +, –, x, ÷) oo u baahan inuu doorto habka ugu wanaagsan
- inuu ku celceliyo kala barka ama xaqiiqooyinka ku dhufashada ee uu yaqaanno si uu u xalliyo masalooyin jajab ku jiro
- inuu helo qiimaha lambar ku jira hannaan xisaabeed
- inuu kala saaro, sameeyo, uuna aqoonsado qaabab 2 iyo 3 dinacle ah
- inuu cabbiro waqtiga uuna helo bedka iyo mugga walxaha
- inuu adeegsado calaamadaha tixraaca khariidadaha iyo baraha jiheeyaha si uu tilmaan u bixiyo
- inuu sawiro walxo isagoo ka eegaya dhinacyo kala duwan
- inuu sharxo natiijada baadhitaanno isagoo tusaya hannaan xisaabyada
- inuu sameeyo tijaabo si uu xal uga gaaro ilaa xad intay suurtogal tahay in dhacdo hirgasho.

### In xoogga la saaro nambarka

Inta lagu jiro sannadka 6aad, boqolkiiba 50–70 waqtiga barista xisaabtu wuxuu ku wajahan yahay barashada nambarka.

# CAAWINTA WAXBARASHADA ILMAHAAGA

YEAR 6

Waalid ahaan iyo qoys ahaan, waxaad maalin walba qayb weyn ka qaadataan waxbarashada ilmihiina, waxaad sidoo kale gacan ka geysan kartaan oo wax kusii kordhin kartaan waxay iskuulka ku baranayaan.

## EE GURIGA

### Akhriska

- Guriga ku hayso buugaag farabadan, majalado iyo wargeysyo qofwalba akhrisan karo – ka raadi buug iyo majalado carwooyinka, dukaamada alaabta horay loo isticmaalay iyo buugaagta maktabaduhu iska iibinayaan. Ha kuu yaalaan buugaag af Ingiriis iyo afkaaga hooyoba ku qoran.
- Markaad carruurtaada wax u akhrinayso ka hadla erayada ama fikradaha qoraalka ku jira ee aan horay idiin soo marin.



In badan lahadal carruurtaada markaad wax wada qabanaysaan. Adeegsp luqadda u fiidan adiga iyo caruurtaada.

Ku dhiirrigeli in carruurtaadu maalin walba wax akhriyaan. Madadaalo ka yeel akhriska oo mar walba ammaan ujeedi dadaalka carruurtaada.

### Qorista

- Carruurtaada ku dhiirrigeli inay wax ka qoraan halyeeyadooda, munaasabadaha ciyaaraha, waxay jecel yihiin ama danaynayaan si taasi uga caawiso inay xiise u hayaan waxay wax ka qorayaan.
- Usoo jeedi carruurtaadu inay ka masuul noqdaan qorista liiska dukaamaysiga toddobaad laha ah, liiska qalabka dibada loo qaadanayo toddobaadka dhamaadkiisa iyo fasaxyada, ama liiska hawlqabadka toddobaadka.

Ka hadal waxa carruurtaadu qoraan. Danee. U isticmaal qoraalkooda dariiq aad ku bilowdo wadahadalka. U dheg raarici ra'yigooda.

### Xisaabta

- Kacaawi ilmahaagu inay ku sii wadaan ku celcelinta xisaabta aasaasiga ah iyagoo isticmaalaya +, –, x, ÷.
- Ilmahaagu gacan ha ka geysteen adeega suuqa weyn. Ka caawi inay helaan tan ugu wanaagsan waxyaabo isku cayn ah balse shirkado kala duwan sameeyeen ama inay kala xushaan alaabada iyagoo isu eegaya miisaankooda iyo qiimohooda.

Xisaabtu waa qayb muhiim ah ee nolosha maalin walba, waxaana jira siyaabo badan oo aad carruurtaada maaweelo uga dhigi karto.



**Ma doonaysaa inaad xog dheeraad ah ogaato?**

Xog dheeraad ah iyo talo bixin ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo horumarkiisa, waxaad kala hadli kartaa macallinkiisa.

WAXBARASHADA ILMAHAAGA

The New Zealand Curriculum

DHAMMAADKA YEAR 7

EE ISKUULKA

# AKHRISKA

READING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Reading Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 7...

heerka akhriskiisu wuxuu kusii dhow yahay curriculum level 4.

Cunugaaga waxaa u suurtoobi doonta inuu helo, ka fekero oo isu ururiyo xog iyo fikrado ku kala jira noocyo buugaag iyo maqaalo kala duwan ah. Inta uu hawshaas ku guda jiro, wuxuu ilmahaagu awoodi doonaa inuu ka fekero su'aalo u gaar ah uuna ka jawaabo su'aalaha laga weydiiyo dhammaan qaybaha manhajka.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu akhristo sheekooyin noocyo kala duwan ah oo ay ku jiraan kuwa dhab ah iyo qaar khayaali ahba, kuwaasoo leh lakabyo micna ah oo ay ka mid yihiin qisooyin culus, fikrado iyo mawduucyo adag
- inuu yaqaan erayada badankood uuna xal u helo erayo adag oo dheeraad ah isagoo adeegsanaya istaraatijiyado kala duwan. Tusaale ahaan isticmaalka aqoonta dhawaaqa xarfaha iyo isagoo isticmaalaya wuxuu horay uga yaqaanay qaybo erayada kamid ah iyo hannaanka xarfuhu isu raacaan
- inuu adeegsado istaraatijida ugu wanaagsan ee xallinta erayada – isagoo ka xulanaya istaraatijiydaha kala duwan ee uu aqoonta u leeyahay – si taasi uga caawiso fahamka wuxuu akhrinayo
- inuu garto oo isticmaalo noocyo naxwaha ah oo ka caawiya fahamka erayo adag oo dheeraad ah
- inuu garashadiisa adeegsado si uu jawaab ugu helo ugana fekero wuxuu akhrinayo, isagoo isticmaalaya akhbaaro kala duwan.

# QORISTA

WRITING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Writing Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 7...

heerka akhriskiisu wuxuu kusii dhow yahay curriculum level 4.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu qoraalkiisa ku wajoho akhristeyaal iyo ujeedooyin gaar ah isagoo isticmaalaya qaabab habboon oo maangal ah lana fahmi karo
- inuu si taxad leh u qorsheeyo mashruucyadiisa qoraalka isagoo isticmaalaya istaraatijiyado kala duwan
- inuu adeegsado baaragaraafyo isku xidha fikradaha muhiimka ah iyo faahfaahinta lagu taageerayo ee gudaha iyo dhexda baaragaraafyada
- inuu qoro weedhooyin naxwohoodu sax yahay isagoo isticmaalaya noocyo kala duwan oo qaybaha luuqada ah iyo xarakayn noocyo badan ka kooban; tusaale: su'aalo balaaqo leh, sarbeebyo, dhibic-hakadyo
- inuu isticmaalo erayo higgaadoodu sax tahay isagoo adeegsanaya istaraatijiyado kala duwan; tusaale: aqoonta dhawaaqa xarfaha, xeerarka iyo caadooyinka higgaada, micnaha iyo higaada qaybo erayga ka mid ah iyo asalka erayada, hannaanka xarfuhu isu raacaan
- inuu muujiyo inuu qoraalka dib u eegid iyo dibusixid ku samaynayo intuusan ebyin.

# XISAABTA

MATHEMATICS STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Mathematics Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 7...

heerka waxqabadkiisa xisaabeed wuxuu noqonayaa bilowga curriculum level 4 isagoo adeegsanaya fahamkiisa sii kobcaya ee tirada, aljebrada, joometeriga, cabbirista iyo istaatistikada.

Cunugaagu wuxuu xallin doonaa masalooyin isagoo isticmaalaya iskudhufasho iyo isuqaybin leh tiro dhimman, jajab iyo boqolleey. Wuxuu hanan doonaa istaraatijiyedo kala duwan oo dhanka fekerka ah oo ka caawin doona baadhitaankiisa xisaabeed.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu xaliyo masalooyin tirodhiman leh isagoo adeegsanaya isugeyn iyo kalagoyn
- inuu isticmaalo habab kala duwan ee iskudhufashada si uu u xaliyo masalooyin leh jajab iyo tirooyin buuxaba
- inuu baadhitaan ku sameeyo oo xaqiijiyo xeerar xisaabeed si uu u ogaado inay mar walba sax noqonayaan
- inuu sameeyo jadwallo, garaafyo iyo xeerar ku saabsan hannaan xisaabeedyada soo noqnoqda
- inuu kala saaro qaabab 2 dhinacle iyo 3 dhinacle ah kana munaaqishoodo isu ekaanshohooda iyo kaladuwanaantooda
- inuu cabbiro walxaha iyo waqtiga isagoo adeegsanaya halbeegyo caadi ah
- inuu helo wareegyada, bedadka iyo mugga qaababka
- inuu muujiyo oo sharxo sida walxaha loogu dhaqaajiyo hannaan gudihiis
- inuu isticmaalo calaamadaha tixraaca, miisaano (qiyaas) fudud iyo baraha jiheeyaha si loo sifeeyo goob laysla ogyahay
- inuu baadhitaan ku sameeyo, kala saaro oo siyaabo kala duwan u soo bandhigo xog, uuna muujiyo hannaanka iyo kala duwanaanshaha xogta
- inuu sahamiyo maamooryo isagoo u maraya tijaabo is barbardhigna ku samaynaya natiijooyinka kasoo baxay iyo kuwii la filayey.

### In xoogga la saaro nambarka

Inta lagu jiro Year 7, boqolkiiba 40–60 waqtiga barista xisaabtu wuxuu ku wajahnaan doona barashada nambarka.

CAAWINTA WAXBARASHADA ILMAHAAGA

# EE GURIGA

Waalid ahaan iyo qoys ahaan, waxaad maalin walba qayb weyn ka qaadataan waxbarashada ilmihiina, waxaad sidoo kale gacan ka geysan kartaan oo wax kusii kordhin kartaan waxay iskuulka ku baranayaan.

YEAR 7

## Akhriska

- Raadi buugaag iyo majalado laxidhiidha waxyaabaha carruurtaadu danaynayaan – arrintani waxay ka caawin doontaa inay khubaro ku noqdaan maaddo gaar ahaaneed. Waxaa dhici karta inay rabaan adeegsiga xusuusqor ama wax kale oo loo isticmaalo diiwaan gelinta xogtay helaan.
- Ku dhiirrigeli carruurtaada inay wax akhriyaan oo raacaan tilmaamaha ku saabsan:
  - sida loo dheelo ciyaar
  - sida loo sameeyo ama loo adeegsado qalab
  - sida looga qaybgalo tartan.

Dareen wanaagsan umuuji mar walba oo carruurtaadu wax akhrinayaan, waxay doonaanba ha akhriyeene. Tixgeli aragtida carruurtaada waxay tusaysaa inay ka fiirsanayaan waxay akhrinayaan.

In badan lahadal carruurtaada markaad wax wada qabanaysaan. Adeegsiga afkaaga hooyo markaad ilmahaaga la hadlayso waxay caawinaysaa barashadooda.



## Qorista

- Ku boorri carruurtaada inay dhegeystaan oo isticmaalaan erayo xiiso leh. Inay garanayaan erayo farabadan waxay ka caawinaysaa inay alifaan sheekooyin sii xoogaysanaya.
- Kala hadal ilmahaaga erayada cusub. Isticmaala qaamuus si aad kuwo dheeraad ah u heshaan. Taageer isku daygooda higgaadinta iyo xarakaynta. Ku dhiirrigeli carruurtaada inay ka hadlaan istaraatijiyada ay u adeegsanayaan xallinta higgaadinta erayada cusub.
- Samaysta xusuusqor waqtiyada fasaxa lagu jiro. Fasaxa ka hor weydii carruurtaadu inay qoraan liiska waxyaabaha suurtagalka ah ee ay doonayaan inay qabtaan kuwaasoo kharaskooda laga bixi karo, hana diyaariyeen qorshe hawlqabad.

Lahadal macallinka carruurtaada si aad u fahamto xisaabaha ay baranayaan iyo waxay ka kororsanayaan shaqada guri ee ay qabanayaan.

Ugad carruurtaada qalabka qorista oo xiiso leh si ay u isticmaalaan. Qalimada rinjiyeynta iyo laabisyadu waxay dhiirrigelin u noqon karaan in wax lagula qoro xaashi gaar ah ama buugaag. Hadiyad usii xusuusqor ama buug yar oo wax lagu qoro. U qorshee waqti ay carruurtaadu kombiyutarka u adeegsan karaan inay wax kuqoraan – ha noqoto guriga ama maktabada.

## Xisaabta

- Isutaga adiga iyo carruurtaadu oo dheela ciyaaraha dibedda iyo kuwa aqalka gudiisaba. Ka hadla sida xisaabtu muhiim ugu tahay xajinta dhibcaha ciyaarta tenniska, kirikitka, kubbada cagta, boojada, isnuukarka iyo dhaartis (toog-gacmeed).
- Ka caawi inay naqtiimaan dhammaan jadwallada iskudhufashada.
- Kala hadal carruurtaada qiimaha alaabada lajebiyey ee magaaladа – 25%, 30%, 10% laga dhimay, nusqiime. Raadiya qiimaha ugu wanaagsan kana sameeya ciyaar aad ku xisaabinaysaan inta idiinka baaqanaysa qiimaha alaabada carruurtaadu danaynayaan.

### Ma doonaysaa inaad xog dheeraad ah ogaato?

Xog dheeraad ah iyo talo bixin ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo horumarkiisa, waxaad kala hadli kartaa macallinkiisa. Weydiiso qoraalka ku saabsan xisaabta ee loogu talo galay waalidiinta.

www.minedu.govt.nz/ParentsSupportingYourChild

WAXBARASHADA ILMAHAAGA

The New Zealand Curriculum

DHAMMAADKA YEAR 8

EE ISKUULKA

# AKHRISKA

READING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Reading Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 8...

heerka akhriskiisu wuxuu noqonayaa curriculum level 4.

Cunugaaga waxaa u suurtoobi doonta inuu helo, ka fekero oo isu ururiyo xog iyo fikrado ku kala jira noocyo buugaag kala duwan ah iyo maqaallo. Inta uu hawshaas ku guda jiro, wuxuu ilmahaagu awoodi doonaa inuu su'aalo weydiiyo kana jawaabo su'aalaha laga weydiiyo dhammaan qaybaha manhajka.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu akhristo buugaag:
  - leh sawiro, qoraallo oodan, jaantusyo, khariidado iyo garaafyo laxidhiidha nuxurka sheekada
  - u baahan sharraxaad, sida ama shirqoollo adag, mawduucyo (kurayda) heerkoodu sarreeyo iyo fikrado dahsoon
- inuu doorto xirfadaha iyo farsamooyinka ku habboon (tusaale: Internetka) helitaanka iyo isticmaalka noocyo akhris kala duwan ah oo laga leeyahay ujeeddooyin gaar ah oo khuseeya manhajka oo dhan; tusaale: akhris looga jeedo helitaanka xog ku saabsan mawduuc cilmi saynis ama cilmi-bulsheed ah
- inuu adeegsado noocyo kala duwan oo istaraatijiyo sii kordhaya ah si uu u kaashado markuusan fahmayn wuxuu akhrinayo
- inuu xal u helo erayo adag oo dheeraad ah isagoo isticmaalaya xirfado kala duwan.

# QORISTA

WRITING STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Writing Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 8...

wuxuu wax u qori doonaa si u qalanta curriculum level 4.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu iskiis wax u qoro, isagoo xulanaya luuqad iyo qaab maangal ah oo la fahmi karo taasoo ku habboon ujeedada qorista
- inuu u adeegsado xogta uu ka helay akhriska wax kaqorista mawduuc isagoo isticmaalaya erayo uu leeyahay
- inuu qoro sheekooyin gaagaaban oo la fahmi karo isla markaana waafaqsan waajibaadka manhajka – kuwaasoo inta badan ay ku jiraan faahfaahin iyo/ama faallo taageeraya ama sharxaya qodobada waaweyn
- inuu sameeyo baaragaraafyo fikradaha muhiimka ah xidhiidh cad ka dhexeeyo uuna la xidhiidhiyo baaragaraafyada kale
- inuu isticmaalo weedhooyin culus oo naxwa ahaan sax ah
- inuu si sax ah u isticmaalo xarakooyinka aasaasiga ah, uuna isku dayo adeegsiga qaar ka mid ah xarakooyinka culus; tusaale: dhibic-hakad, labadhibcood, bilo
- inuu isticmaalo erayo iyo weedhooyin ku habboon mawduuca, akhristayaasha, munaasabada iyo ujeedada
- inuu fahmo in qoraalka laga leeyahay ujeedooyin kala duwan uuna garanayo siduu taas u samayn lahaa.

# XISAABTA

MATHEMATICS STANDARD

## Haddii ilmahaagu gaadho Mathematics Standard ka laga doonayo dhammaadka Year 8...

wuxuu hawlqabadkiisu noqon doonaa mid u qalma curriculum level 4 isagoo adeegsanaya fahamkiisa sii kobcaya ee tirada, aljebrada, joometeriga, cabbirista iyo istaatistikada.

Cunugaagu wuxuu awoodi doonaa inuu isticmaalo istaraatijiyado iskudhufasho si uu u xaliyo masalooyin leh jajab, tiro dhimman iyo boqolleey. Waxaa u suurtoobi doonta inuu sharxo habab kala duwan ee lagu xaliyo masalooyinka. Cunugaagu wuxuu hanan doonaa istaraatijiyedo kala duwan oo dhanka fekerka ah oo ka caawin doona baadhitaankiisa xisaabeed.

**Si uu u gaaro heerka laga rabo, cunugaagu wuxuu baran doonaa:**

- inuu xaliyo masalooyin leh tirooyin dhiman iyo tirooyin dhan isagoo adeegsanaya isugeyn iyo kalagoyn
- inuu isticmaalo habab iskudhufasho oo kala duwan si uu u xaliyo masalooyin leh tirooyin buuxa iyo jajabyo

### In xoogga la saaro nambarka

Inta lagu jiro Year 8, boqolkiiba 40–60 waqtiga barista xisaabtu wuxuu ku wajahnaan doona barashada nambarka.

- inuu sameeyo jadwallo, garaafyo iyo xeerar ku saabsan hannaan xisaabeedyada soo noqnoqda
- inuu walxaha cabbiro uuna sameeyo isu beddelaad fudud oo u dhexeysa halbeegyada cabbirka
- inuu helo cabbirka wareega iyo bedka leydiyada, afargeesyada barbarraalayaasha ah, saddexgeesleyaasha, iyo mugga lixgeesleyaasha 3 dhinaclaha ah
- inuu sahamiyo beddel xisaabeed oo ka munaaqishoodo sida qaababka iyo hannaanku isu rogaan beddelka dabadi
- inuu goobo (meelo) sifeeyo oo wax tilmaamo isagoo isticmaalaya qiyaas, xisaabinta jihada dhaqaaqa iyo xariiqyada baraha khariidada
- inuu soo ururiyo oo adeegsado macluumaad bixinaya dhowr nooc oo akhbaaro ah (tusaale: da'da iyo weynanka)
- inuu kala saaro macluumaadka oo siyaabo kala duwan usoo bandhigo, uuna ka munaaqishoodo hannaanka iyo jihada isbeddelka
- inuu isticmaalo jajabyo si uu uga munaaqishoodo suurtogalnimada natiijooyin nasiib ku tacaluqa.

Waalid ahaan iyo qoys ahaan, waxaad maalin walba qayb weyn ka qaadataan waxbarashada ilmihiina, waxaad sidoo kale gacan ka geysan kartaan oo wax kusii kordhin kartaan waxay iskuulka ku baranayaan.

# EE GURIGA

## Akhriska

- Gacan ka geyso ururinta maqaallada wargeysyada iyo majaladaha iyo weliba akhbaar laga helo bogaga Internetka oo khusaysa mawduucyo laga yaabo inay carruurtaadu iskuulka ku baranayaan.
- Kala hadal carruurtaada waxay ka akhrinayeen bogaga Internetka. Maxay ka kororsadeen? Maxaa su'aalo ah oo ay weli qabaan? Xaggee kale oo ay xog waxtar leh ka heli karaan?

*U noqo kudayasho wanaagsan carruurtaada. Ha ku arkaan adigoo akhriska ku raaxaysanaya – ha ahaado wargeys, majalad, shaactiro, buugta cunto kariska ama kuwa sheekooyinka la alifey. Waxaa kuwan kamid noqon kara majalado, wargeysyo iyo buugaag ku qoran afkaaga hooyo.*

*In badan lahadal carruurtaada markaad wax wada qabanaysaan. Adeegso luqadda u fiican adiga iyo caruurtaada.*



*Ka hadal waxa carruurtaadu qoraan. Danee. U isticmaal qoraalkooda dariiq aad ku bilowdo wadahadalka. U dheg raarici ra'yigooda.*

## Qorista

- Ku boorri carruurtaadu inay bilaabaan blog/wiki Internetka ah si ay xog ula wadaagaan qoyskooda iyo saaxiibadood.
- Ka caawi carruurtaadu inay raadiyaan xog ku saabsan taariikhda qoyskaaga ama sheekooyin qoyska ku tacaluqa isla markaana diiwaan geli sheekooyinkaas si aad ula qaybsataan xubnaha qoysaska kale. Adeegsada sawiro si ay ubayaamiyaan buugaan qoyska.





## Xisaabta

- Isu taga carruurtaada qorshena u sameeya markay urursadaan lacag dhan $10/$20/$30 – waa maxay sida ugu haboon ee loo isticmaali lacagtooda maalin dibedda loo baxay?
- Carruurtaadu ha daawadeen dukumantari (filim ama barnaamij kusaabsan dhacdo dhab ah). Kuwan waxaa badanaa ka buuxa akhbaaro iyo xaqiiqooyin xisaab adeegsanaya.
- Samee xaashi xisaabeedka kombiyutarka si aad ugu qorto horumarka kooxaha ciyaaraha ee carruurtaada ama kooxdooda fanka (ama tan ay la dhacsan yihiin), oo ay ku jiraan ciyaaraha la dheelay, jilitaanka la sameeyey, ganaaxyada, dhibcaha, ciyaaryahanka/jilaaga ugu fiicnaa maalintaas.

*Habka ilmahaagu u baranayaan xallinta masalooyinka xisaabta waxaa laga yaabaa inuu ka duwan yahay kii markaad adigu iskuulka dhigan jirtay. Ha ku tuseen siday wax u sameeyaan kuna taageer waxay baranayaan.*

**Ma doonaysaa inaad xog dheeraad ah ogaato?**

Xog dheeraad ah iyo talo bixin ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo horumarkiisa, waxaad kala hadli kartaa macallinkiisa.

www.minedu.govt.nz/ParentsSupportingYourChild

Qoraallada Macallinka

# Teacher Notes

## What is the content of this booklet?

This booklet is a condensed version of the Supporting Your Child's Learning series of 9 fold-out sheets available in English.

The first two pages outline how parents, families and whānau can support their children's early learning – from birth until they start school. There is content about reading, writing, mathematics, learning in early childhood education services and learning at school.

There are then two pages for each year level (1–8) – the first explains what children will be able to do if they are meeting the National Standards in reading, writing and mathematics for that year level; the second gives practical, every day, fun tips and ideas for how parents, families and whānau can support their child's learning at home.

## How can I use this booklet with parents, families and whānau?

Like the fold-out sheets, this booklet can be used in discussions with parents, families, whānau and students and can be taken home as reference material. Your conversations with parents whose first language is not English could include the following messages:

- Recognising and celebrating the 'whole' child, including their identity, language and culture is important in children's learning.
- Using the family's first language at home also supports children's reading, writing and oral language learning.
- Children can learn in two languages.
- It is easier for children to learn two languages when they are younger than when they are older.
- If their child is a new learner of English, the school may decide it would be fairer to report to them using The English Language Learning Progressions for the first two or three years. The Progressions describe reading, writing, and the speaking and listening expectations for children who are new learners of English. They also help their child's teacher to provide an appropriate teaching and learning programme to help their child make fast progress in these areas. As their child's achievement in reading and writing gets closer to their peers, the school will report progress in reading and writing in relation to the National Standards. Schools will use the Mathematics Standards to report on their child's maths progress and achievement.

## How can I access different language versions?

More copies of the translated booklets can be ordered on-line from Down the Back of the Chair at www.thechair.minedu.govt.nz or by email orders@thechair.minedu.govt.nz. Each language has a unique order number that must be quoted: Arabic (order number 2010AR), Chinese (2010CH), Cook Islands Māori (2010CM), Dari (2010DR), Hindi (2010HD), Korean (2010KR), vagahau Niue (2010NU), gagana Sāmoa (2010SM), Somali (2010SL), Tagalog (2010TG), Te reo Māori (2010TM), Thai (2010TH), gagana Tokelau (2010TK), Tongan (2010TN).

Copies of the English series of fold-out sheets can also be ordered from Down the Back of the Chair. Item numbers are: Early Learning (2010EL), Year 1 (2010Y1), Year 2 (2010Y2), Year 3 (2010Y3), Year 4 (2010Y4), Year 5 (2010Y5), Year 6 (2010Y6), Year 7 (2010Y7), Year 8 (2010Y8), Years 1–8 set (2010ST).

**The content can also be accessed or downloaded at:**
www.minedu.govt.nz/ParentsSupportingYourChild

Item no. 2010SL